# Tababarka Bulshada: Jawaab celinta Bulshada

Xulashada Tababarka Bulshada ku Salaysan waxay bixiyeyaasha waxbarashada xiliga hore ka caawin doontaa in ay buuxiyaan shuruudaha shaqaalaha shatiga haysta kaasoo looga baahan yahay in uu haysto shahaado hore ama gaaban. Xulashadaan waxaa sidoo kale loo yaqaanaa 'u dhiganta.' Yoolka laga leeyahay waa in la bixiyo nidaam tababar oo bulshada dhexdeeda ah kaasoo loo heli karo qaab onleen ah ama foolka-fool ah.

Xulashadaanu hadda waxay kujirtaa diyaarin shaqadaanuna waxay qayb ka tahay ujeedooyinka lagu cadeeyay House Bill 2556 ee **tinyurl.com/SHB2556**.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, eeg qoraalka *HB 2556 Gunaanadka Agaasinka* (EPS_0034) si onleen ah:

- Ingiriisi: **tinyurl.com/EPS0034**
- Isbaanish: **tinyurl.com/EPS34SPAN**




## Istiraatiijiyadaha La xiriirista iyo Ka qaybgalinta

Kooxda Horumarinta Xirfadaha ee DCYF waxay samaysay dhowr dhacdo xiriir gaarsiin iyo ka qaybgalin ah inta u dhexaysa Noofambar 2020 iyo Janaayo 2021. Jawaab celinta la helo waxay saamayn ku yeelan doontaa diyaarinta iyo keenista u dhigmaha Tababarka Bulshada.

### Kulan Kooxeedka Waxbarashada Xiliga hore ee lagu qabanayo Zoom=ka

**Noofambar 19, 2020 iyo Janaayo. 21, 2021**



Qiyaastii Bixiyeyaasha Waxbarashada xikiga hore oo kukala hadla luuqadaha 100 Ingiriis ah, 45 Isbaanish ah, iyo 10 Soomaalia h iyo shaqaalaha Kaalmada ayaa xaadiray 3 qol oo nasiino oo looogu tala galay luuqad kasta oo ay ku hadlaan.



### Wuxuu Taageero siiyaa Bandhigtyada Kulamada Guddi hoosaadyada

**Diisambar 9, 2020**

### La tashiga Waraysiyada Tababarka


**Janaayo 11 – 15, 2021**

Child Care Aware (Ogaalka Daryeelka Caruurta) ee Washington
SEIU 925 |Machadka Imagine
Codadka Berri Ururka Daryeelka Caruurta Washington

## Jawaab celinta La helay

Jawaab celintu waa isku keenista dhammaan dadaalada xog gaarsiinta lagu xusay qaybta kore waxaana loo qaabeeyay mowduucyo ahaan hadba sida ay u kala muhiimsan yihiin kuwaas oo lagu ogaaday dhammaan kulamadii is aragyada ahaa. Calaamadahaan waxaa kamid ah qodobada ugu muhiimsan ee ay ogaadeen daneeyeyaashu.

**Liis faahfaahsan oo jawaab celin ah ayaa ku qoran boogga soo socda.**




Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Xog gaarsiinta Tababarka Bulshada iyo la Falgalka – Jawaab celinta La helay

Ayada oo daba socota dadaalada ka qaybgalka ee DCYF, waxyaabaha soo socda waxa ay bixinayaan muuqaalka faahfaahsan ee soo jeedinta daneeyeyaasha iyo bixiyeyaasha waxbarashada xiliga hore ee xulashada Tababarka Bulshada.

### Kharashka Tababarka

- Tababarka waa in lagu helo qiimo jaban ama si bilaash ah ama waa in uu jiraa qaab magdhow ah oo u diyaarsan daboolista kharashka tababarka.
- Kaalmada dhaqaalaha lagu iibsanayo internetka xawaaraha sare leh ee tababarka ayaa la codsaday.
- Kaalmada dhaqaale ee lagu iibsanayo qalabka elektoroonigga ah si loo dhammaystiro tababarka qaab onleen ah ayaa sidoo kale la codsaday.

### Qaabka Bixinta Tababarka

- Tababarku wuxuu waxbarashada dadka waaweyn ku darayaa aragtida iyo adeegsiga sida shaqada loo qabanayo.
- Isbadbadalidda qaabka onleenka ah ayada oo la joojin karo marka loo baahdo lana kaydin karo wixii horey loosoo maray.
- Tababarku wuxuu gadaal ka leeyahay qiimayn ayada oo la heli karo qof su'aalaha la weydiiyo.
- Tababarka waxaa la heli karaa maalmaha fasaxa todobaadka iyo makhribadii.
- Bixiyaha tababaku wuxuu imaan karaa goobtayda shaqada si uu u indha-indheeyo waxna ii baro.
- Tababarka waa ka qaybqaadasho, isdhexgal, waxaana kamid ah howlo lagu fulinayo barnaamijyadooda.
- Tababarka waxaa kamid ah wadashaqaynada dadka isku fikirka ah ee isku dhaqanka ah, isku bulshada ah, sidoo kalena isku khibradda ah.
- Tababarku wuxuu adeegsadaa hal nidaam umana baahna akoon ama in laga galo meelo fara badan.
- Xulashooyinka bixinta qaababka badan ayaa diyaar ah si loo taageero helitaanka qaababka iyo waxbarashada. Tusaalooyinka waxa akamid ah in tababarku yahay fool-ka-fool, onleen toos ah, onleen qofku diyaarsanayo, mid qofku diyaarsanayo oo aan onleen ahayn, iyo qof su'aalaha lagala xiriiro.
- Fududeeyaha tababarku waa mid joogto ah waana qof ka socda bulshada oo yaqaana sida loogu shaqeeyo bixiyaha waxbarashada xiliga hore.
- Tababarku wuxuu leeyahay nidaamyo takhasusi ah oo la xiriira meelaha suda gaarka ah loo danaynayo.

### Mowduuca tababarka

- Tababarku wuxuu caawinayaa oona diyaarinayaa tayada shaqaalaysiinta shakhsiyaadka ku tiirsan, sida wad xiriiridda, dhisidda xiriirka, akhlaaqda shaqada, isbadbadalka, iyo dabacsanaanta.
- Tababarku wuxuu diiradda saarayaa qaabka caruurta isdhexgel loola sameeyo.
- Tababarku wuxuu diiradda saarayaa horumarinta dareenka bulshada iyo qaabka loo shaqeeyo baahiyaha culculus.
- Waxyaabaha tababarka kujiraa waxay dhisayaan diyaarinta xiriirada ka dhexeeya qoysaska iyo carurrta, asaga oo daboolaya nidaamyo wada xiriiris ah oo kala duwan.
- Waxyaabaha tababarka kujira waxay balaarinayaan daryeelka loogu tala galay dhibaatada maskaxda soo gaarta iyo waxyaabaha xunxun ee canuggu xiliga hore la kulmo, iyo qaabka loo taageero caruurta iyo qoysaska ayada oo aan shakhsi ahaan loo qaadanayn habdhaqanka.
- Waxyaabaha tababarka kujira waxay wax ka qabanayaan isbadbadalka jawiyada waxbarashada ee xiliga hore iyo saamaynta dhammaan shaqaaluhu ku leeyihiin fasalka.
- Tababarku wuxuu gacan ka gaysanayaa ka qaybgalka fasalka.
- Tababarka baraya waxyaabaha ku saabsan taariikhda hore ee xirfadda, guulaha waaweyn, iyo ilaha laga helayo heer gobol iyo heer qaranba.
- Tababarku wuxuu dhisaa khibradda hada jirta wuxuuna bixiyaa fursadloogu tababaran karo.
- Tababarka baraya waxay ka dhigan tahay in oleoleeye la noqdo.
- Ilaha waxaa lagu diyaariyay luuqado kale.
- Tababarka waxaa loo isticmaali karaa in lagu qaato xiisadaha koleejka.
- Macluumaadka kujira tababarka laga heli karo gobolka oo dhan, sida Creative Curriculum, WAC la xiriira/gaar ah, CLASS/ECCERS, iyo tababar kasta oo macalinku ku faraxsan yahay in uu dhammaystiro.
- Tababar wata dhaqan kaasoo iftiiminya dhaqamada iyo bulshada lana dabaldagaya manhajka awoodda ku salaysan.
- Tababar garowsan heerka hadda jira ee aqoonta iyo qaabka hiddaha ah ee caruurta loo koriyo.
- Macluumaadka waxaa kamid ah gogoldhigga falsafooyinka ECE, guudmarka koritaanka caruurta, iyo howlo caddaymo ku salaysan
- Qayb kamid ah tababarada ayaa loo adeegsan karaa dhammaystirka xulashadaan.
- Tababarku wuxuu isticmaalayaa luuqad ay yaqaanaan bixiyeyaasha waxbarashada xiliga hore iyo WAC-ga la xiriira.

## Caqabadaha Tababarka

- Wuxuu u baahan yahay helitaanka qalakbka elektoroonigga ah si loo dhammaystiro marinada oo qaab onleen ah.
- Helitaanka kombuyuutarka shaqadu mar kasta ma ahan mid diyaar ah la iskuna halayn karo.
- Abuurista nidaam aysan dhiirigalinayn eex iyo cunsuriyadda hannaankii hore ee waxbarashadu.
- Abuur tababar buuxinaya shuruudaha looga baahan yahay kaalinta mustaqbalka fog.
- Kaalmada farsamada si loo taageero isticmaalka kombuyuutarka iyo nidaamka.
- Tababarku wuxuu u baahan yahay in uu ku diyaarsanaado luuqado badan.
- Bixiyeyaashu waxay hayaan dadaalo fara badan wakhti dheeraad ahna ua hayaan dhammaystirka shuruudo dheeraad ah. Diiraddoodu waxaa dhici karta in aysan ahayn kulanka shuruudaha waxbarashada.

## Muujinta Waxbarashada

- Tababarka waxaa qaban karaa ayada oo laga shaqaynayo fasalka ayada oo uu qabanayo agaasimaha ama kormeeraha barnaamijka.
- Shaqaaluhu waxay ka tarjumi doonaan waxbarashadooda ayaga ka dhexaysa iyo agaasimaha.
- Shaqaaluhu wuxuu hagayaa qofka kale ee leh aqoontiisa oo kale.
- Waxbarashadu waa mid la taaban karo waxaana lagu muujinayaa fasalka dhexdiisa.
- Inta lagu jiro tababarka shaqada, shaqaaluhu wuxuu dulmari karaa indha-indhaynta qofka goobta ka maqan (sida, tababaraha) kaasoo bixinaya jawaab celinta xirfadaha lasoo bandhigay.
- Ardaydu ma doonayaan in ay qoraan qoraalo ama warbixino.
- Ardaydu waxay doonayaan in way wada yeeshaan wadasheekaysi ama ay sameeyaan howlaha muujinaya waxbarashada dadka waaweyn ee fasalka.
- Ardaydu waxay doonayaan in ay samaystaan in kormeerahoodu shaqada ka maqnaado warbixintoodana loogu daro (sida xiliyada saacadaha).
- Tababaruhu waa in uu smaeeyaa qiimayn si uu u tijaabiyo aqoonta imaanaysa xiliga tababarka.
- Macalimiintu waxay samayn karaan isqiimayn ku saabsanwaxa ay kusoo dareen barnaamijkooda ee ka imaanaya tababrkii ay dhawaan dhammeeyeen.
- Bandhigyadu waa in ay ahaadaan kuwo isbadbadalaya dhammaan awoodaha iyo qaababka waxbarashada oo ay kujiraan kuwo lagu heli karo hadal afka ah (sida, wada xaajoodyada, bandhigyada).
- Sharci guud waa in la isticmaalaa si loo xaqiijiyo in tirooyin gaar ah la gaaray.
- Tababreyaashu waa in ay xoriyad u helaan go'aaminta qaabka tirada lagu gaarayo si loogu gaar yeelo fasal gaar ah.
- Ardaydu waxay doonayaan in ay dhammaystiraan tijaabo qoraal ah si ay u muujiyaan waxbarashadooda.
- Tabareyaasha iyo hageyaashu waxay taageeri karaan dadka si loo dhammaystiro tababarka.

## Wada-hadal

- Waxay ka caawinaysaa tababridda bixiyeyaasha nidaamyada kala duwan iyo xulashooyinka ay haystaan.
- Waxay bixisaa xiriir dheeraad ah oo ku saabsan xulasooyinka waxbarashada.
- Waxay abuuraysaa websayt isticmaalka ku fiican iyo waayo aragnimada MERIT taasoo fududaynaysa isticmaalka dhammaan macluumaadka diyaarka ah.
- Waxay shakhsiyadaynaysaa agabyada si bixiyeyaashu ay u arkaan qaabka nidaamku u egyahay si iskood ah.
- Xiriirka waadaxa ah iyo dukumiintiyada ka warbixinaya Barta Xiriirka ee macluumadaka loo baahan yahay si ay u helaan ilo looga baahan yahay caawinta dadka kale.
- Helitaanka kanaalka xiriirka ee point of contact (barta xiriirka, POC) si loo helo macluumad dheeraad ah.

## Talaabooyinka Xiga

Jawaab celinta laga soo aruuriyay dhammaan fursadaha xiriirada laga soo aruuriyay bulshada waxaa dib u eegis loola smaayn doonaa tababrka lala tashanayo sida la helay. Soojeedinadaan waxaa loo tixgalin doonaa diyaarinta socota ee u dhigmidda tababarka bulshada.



## Xog Dheeraad ah

Bookho bogga websaytka DCYF **www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev** waxaadna tagtaa qaybta *"Aqoonsi Kale (Taxanaha Tababar Kusaleysan Bulshada)"* ee *bogga* U qalmidda Shaqaalaha.

Si aad u bixiso jawaab celin dheeraad ah ama macluumaad dheeraad ah, la xiriira Diana Stokes **diana.stokes@dcyf.wa.gov**.

*Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumiintigaan oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Constituent Relations (Xiriirka Deegaanada) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION EPS_0041 SM (02-2021) Somali